

Duqda magaalada Durkan ayaa u dabaaldegaya wejigii ugu dambeeyay ee dayactirka buundada Galbeedka Seattle ee uu socdo, iyadoo ku ilaalinayso Magaaladu wadadii ay dib ugu furi lahayd buundada 2022 dhexdeeda

Duqa Seattle Jenny A. Durkan iyo kooxda Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) ayaa u dabaaldegaya wejigii ugu dambeeyay ee dayactirka buundada West Seattle ee bilawday, SDOT waxay ku jirtay jadwal ay dib ugu furayso buundada si xoogen sanadka soo socda. [Press conference oo muqaal ah ayaa laga heli karaa online.](#)

"Ilaa Maarso 2020, magaaladeenu waxay la kulantay caqabado aan horay loo arag, oo ay ku jiraan xiritaanka Buundada Galbeedka Seattle. Kadib markaa la dhameeyo shaqada muhiimka ah ee lagu xasilinayo buundada iyo naqshadaynta dayactirka khaaska ah, SDOT waxay bilaabaysaa wajigii u dambeeyay ee dayactirka Buundada Galbeedka Seattle. Shaqada ay qabatay SDOT awgeed, buundada ayaa la filayaa inay dib u furmato bilaha soo socda. Tani waa guul muhiim u ah dadka deggan, rakaabkayaga, iyo ganacsiyada annaga oo si degdeg ah uga shaqaynayna isku xirka Galbeedka Seattle iyo gobolka weyn, " ayee tiri Duqa magaalada Durkan.

SDOT waxa ay si hagar la'aan ah uga shaqaynaysay dayactirka Buundada Galbeedka Seattle tan iyo markii la xiray bishii Maarj 2020. Magaaladu waxay dhamaystirtay wajigii kowaad ee dayactirka xasilinta sanadka 2020, wixii markaas ka dambeeyay waxay dhamaystirtay naqshadaynta buundada waxayna dooratay qandaraasle khaas ah si uu u dhamaystiro shaqada. Hadda, shaqaalihii dhismuhu waxay ku noqonayaan Buundada Galbeedka Seattle si ay u bilaabaan wejigii ugu dambeeyay ee shaqada mudnaanta sare leh ee lagu hagaajinayo buundada iyo u diyaarinta dib u furista sanadka soo socda. SDOT waxay sidoo kale ku dari doontaa epoxy iyo waxee ku duubi doonta carbon fibers [buundada Spokane St Swing Bridge](#) si ay u buuxiso dildilaaca jira oo ay u sii xoojiso buundada.

[Nooca ugu dambeeya ee dayactirka](#) waxaa ka mid ah:

- Ku durida epoxy dildilaaca waxey xirta ugana ilaalisaa daxalka.
- Ku duubida qaybaha ka mid ah qaab-dhismeedka oo leh polymer-ka-xoojinta fiber carbon ee badiso adkeysiga sido kale xoojiyo buundada, oo la mid ah qof loo geliyey kabka markuu laftooda jabay.

Ku rakibida fiilooyinka birta adag ee loo yaqaan 'post-tensioning strands' iyada oo la dhex marayo buundada oo dhan. Xarigkaani waxay xoojiyaan shubka, si la mid ah buundada qalfoofkeeda.

SDOT iyo qandaraasleheeda dhismaha ee Kraemer North America waxay ku heshiiyeen jadwal dhisme oo dhamaystiri doona dayactirka 2022 dhexdeeda, iyadoo la sugayo arin kasta oo aan la filayn sababtoo ah dhacdooyinka cimilada aadka u daran, dhibaatooyinka silsilada sahayada, yaraanta shaqaalaha, ama xaalado kale oo lama filaan ah. Ka dib markii uu dhamaystiro

Kraemer dayactirka, SDOT waxay tijaabin doontaa buundada xoogeeda iyo adkeysigeeda ka hor inta aan dib loogu furin taraafikada. Waxaan soo sheegi doonaa taariikh gaar ah oo dib-u-furista - iyo hawlaha bulshada si loogu dabaaldego - marka ay shaqadu sii socoto.

Barnaamijka dib u hagaajintu waa hawl weyn oo ku lug leh in lagu daro 91 tan oo xarig bir ah Buundada Galbeedka Seattle - oo dhererkeedu ka badan yahay 46 mayl haddii la fidinayo dhammaad-illaa-dhamaadka. Magaaladu waxay sidoo kale ku dari doontaa wax u dhigma in ka badan 2 garoon kubbadda cagta ah oo ah polymer-ka la xoojiyay fiber carbon, waxayna kor u qaadi doontaa 10,000 cagood oo laba jibbaaran oo goobo shaqo ah oo weheliya buundada dhererkeedu yahay 1,300 feedh.

Inta lagu jiro dhismaha, shaqada ugu badan ayaa ka dhici doonta gudaha buundada oo aan laga arki karin dibadda. Waxaa jiri doona xoogaa saameyno dhismo ah oo xaddidan, sida xirmidda buundada hoose ee xilliyada habeenkii, saameynada baarkinka ee buundada hoosteeda, iyo saameyno kale oo xaddidan inta shaqadu sii socoto.

La soco wixii ku saabsan sameynaha taraafik kasta iyo marxaladaheena ugu waaweyn ee dhismaha ee [blog-ka SDOT](#), [bogga internetka](#), [cusbooneysiinta iimaylka asbuucwalbe](#), iyo social media. SDOT waxay wadaagi doontaa sawiro iyo muuqaalo inta uu socdo hawsha dhismaha si ay dadwaynaha ula socodsiiyaan waxa dhacaya.